



Southwark

Keep Warm Keep Well

Diirranaan waa caafimaad

Wadashaqayn si loo xalliyo saboolnimada shidaalka

Yabooh kaalmo iyo talo ku saabsan sidii gurigaagu u noqon lahaa hoy diirran, una bixin lahayd qaansheegtooyinka (bills) shidaalka



Sideen u beekhaamin karaa lacagta qaansheegtooyinka shidaalka?

- Hubi inaad u adeegsatay qalabka diirrinta sida si ugu waxtarnimo badan.
- Raadi, haddii aad heli kartid, deeq kaa kaalmaysa kharajka diirrinta. Waa suurtagal inaad dhaqaalaysatid ilaa 50 geni sannadkiiba haddii aad derbiyada hoygaaga aad dahaarisid (insulation).
- Raadi inaad lacag ku dhaqaalaysid adigoo deminaya qalabka kulka bixiya (supplier) ama beddelaya qaabka aad u bixisid qaansheegtooyinka shidaalka.
- Raadi, haddii aad heli kartid, kaalmo dhinaca qaansheegtooyinka shidaalka waqtiyada qaboobaha (winter).

Warar dheeraad ah oo ku saabsan sida habboon ee aad u isticmaali kartid tamarta (energy) waxaad ka heli kartaa bogga websaydka beekhaaminta tamarta (Energy Saving Trust):

www.energysavingtrust.org.uk



ama telefonka hoos ku qoran u dir
rugta beekhaaminta tamarta ee deegaankaaga

0800 512 012

Waa ay igu adagtahay inaan iska bixiyo biilasha shidaalka. Ma jiraan meelo aan kaalmo weydiisan karo?

Haddii lagugu leeyahay qaan ku saabsan biilasha gaaska ama korontada, toos ula xiriir qolada aad ka qaadatid shidaalkaas. Waxaa ku waajib ah qoladani in ay kuu dejiyaan qorshe aad ku bixin kartid lacagta lagugu yeeshay oo awooddaada ku salaysan. Qolada ku siisa shidaalka waa in ay kuu sameeyaan qorshaha ugu habboon oo aad ku qaan bixi kartid, waana in ay tixgeliyaan awooddaada dhaqaale.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo ama talo biilashaada shidaalka ku saabsan waxaad kala xiriiri kartaa wakiillada ama wakaaladaha (agents) talo-siinta ee deegaankaaga. Faahfaahin buuxda waxaad ka haysaa www.southwarkadvice.org.uk

Southwark CAB

Telefon la-talin 0844 499 434

Peckham CAB

 97 Peckham High St, SE15 5RS

Xafiiska aad tegi kartid ballan la'aan:

Isniin	10ka am - 1da pm
Arbaco	10ka am - 1da pm
Jimce	10ka am - 1da pm

Bermondsey CAB

 8 Market Place, Southwark Park Road, SE16 3UQ

Talaado 10ka am - 1da pm
Khamiis 10ka am - 1da pm

Blackfriars Advice Centre

 131 Camberwell Road, London SE5 0HF

Xafiiska aad tegi kartid ballan la'aan:

Isniin – Khamiis 10 am 12 pm

Isniin. Talaado iyo Khamiis 2da pm – 4ta pm

Miiska soo-dhoweynta wuxuu u furan yahay weydiinnada maalmaha:

Isniin ilaa Jimce, 10ka am – 12ka pm iyo 2da pm - 4:30ka pm, iyo gelinka dambe ee Arbacada 5ta pm – 7da pm

Waa suurtagal inaad heshid deeq kaa caawinta iska bixinta lacagaha kugu haray ee biilasha shidaalka iyo sidoo kale qaar ka mid ah biilal ka dhashay adeegyadaa guriga la xiriira (household). Si aad u ogaatid inaad u suuban tahay helitaanka kaalmada noocan ah, booqo websaayda British Gas Energy Trust: www.britishgasenergytrust.org.uk ama weebka EDF Energy Trust website at: www.edfenergytrust.org.uk
Thames Water Trust www.twtf.org.uk

Southwark

Keep Warm Keep Well

Diirraan waa caafimaad

Ulajedooyinka ugu waaweyn ee iskaashigan (partnership) waxay yihiin:

- Degmada Southwark in ay gacan ka geysato dhimista karbonka.
- Kaalmo fidin si loo fududeeyo dhibaatooyin ka dhasha awood la'aanta iska-bixinta kharajka shidaalka.

Iskaashigan (partnership) wuxuu abaabulaa kulan lagu dhiirrigelinayo wakaaladaha (agencies) in ay wadajir u shaqeeyaan si ay u hubantigeliyaan in degganayaasha degmadu helaan talo iyo taageero haleelsiisa in ay xal u helaan arrimo ay ka mid yihiin:

- Tashiilid tamarta (energy) iyo lacagta iyagoo la siinayo talooyin ku aaddan beekhaamin tamarta ay isticmaalaan iyo sida ugu habboon ee loo isticmaali karo shidaalka.
- Kaalmo lacageed loogu talo galay iska-bixinta biilasha shidaalka oo ay wehliyaan talooyin la xiriira deymanka lagu leeyahay degganaha iyo deeqaha la siiyo.
- Deeqo la heli karo oo loo qoondeeyey horumarinta tayada wax qabadka shidaalka ee hoygu isticmaalo.
- Caafimaad ku noolaasho.

Kulanka waxaa wadajir u abaabulay Hay'adda Southwark ee Talo-sharci bixinta (Southwark Legal Advice Network –SLAN) iyo Kooxda Tamarta ee Southwark.

Xog dheeraad ah waxaad ka heli kartaa

www.southwarkadvice.org.uk